



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDW 433 /2020

TR. 19/09/2020

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO, TANAASUL, QAYIM IYO WAKAALAD GAAR AH.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 19/09/2020, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1-) C/risaaq Jaamac Maxamuud "Gaabane", Somali ah, Ku Dhashay G/kacyo, Sanadkii 1970, Ina Xaawo C/salaam Cilmi, oo sita Somali Passport NO.P00550053.

2-) Aadan C/salaan Warsame, Somali ah, ku Dhashay Emey-Eth, Sanadkii 1958, ina Saciido Xasan Warsame, oo sita Canadiyan Pass.I.r.GA171322.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga caddeeyeen in uu geeriyooday Marxuum la oran jiray MARXUUM MURSAL JAAMAC BOOTAAN, kuna geeriyooday G/kacyo, 2016, Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in Marxuumka Aabihiis uu Ka geeri horeeyey, Wuxuuna ifka uga tagay oo dhaxlaya Hooyada Marxuumka 1,Xaas, 3,Wiil, iyo 2,Gabdhoo, waxayna kala yihiin sidan soo socota:-

DADKA:-

1-Caasho	Maxamuud	Axmed	Marxuumad		(Hooyadii Marxuumka)
2-Farxiyo	Muuse	Jaamac	Degan Garowe	Dhalatay 1975	(Xaaskii Marxuumka)
3- C/Ilaahi	Mursal	Jaamac	Degan Garowe	Dhashay 1997	(Wiilkii Marxuumka)
4- C/casiis	Mursal	Jaamac	Degan Garowe	Dhashay 1999	(Wiilkii Marxuumka)
5- Fardowso	Mursal	Jaamac	Degan Garowe	Dhalatay 2001	(Gabadhii Marxuumka)
6- Yuusuf	Mursal	Jaamac	Degan Garowe	Dhashay 2002	(Wiilkii Marxuumka)
7- Maryan	Mursal	Jaamac	Degan Garowe	Dhalatay 2007	(Gabadhii Marxuumka)

Intaas Kadib Waxaa Geeriyootay Marxuumad Caasho Maxamuud Axmed, Kuna Geeriyootay G/kacyo, Sanadkii 2019, Aabaheed, hooyadeed iyo Saygeediina Way Ka geeri horeeyeen, Ayna Dhaxlayaan 4-Wiil Waxayna Kala Yihiin.

1- C/Ilaahi	Cumar	Bootaan	Degan Canada	Dhashay 1941	(Wiilkii Marxuumada)
2- C/Salaan	Cumar	Bootaan	Degan G/kacyo	Dhashay 1941	(Wiilkii Marxuumada)
3- Nuur	Jaamac	Bootaan	Degan Garowe	Dhashay 1957	(Wiilkii Marxuumada)
4- Saciid	Jaamac	Bootaan	Degan G/Kacyo	Dhashay 1959	(Wiilkii Marxuumada)

EEG BOGGA LABAAD





Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in aysan jirin cid kale oo Marxuumka dhaxleysa haday noqon laheyd Asal Ama Farac.

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXMUUMKA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUM MURSAL JAAMAC BOOTAN** uu ifka uga tagay hanti ka kooban Guri Burbursan oo ku yaal xamar Degmada (**KAARAAN**) Lehna **W.L.DH.BB/22/38/2019, Tr. 24/07/2019** iyo **Rasiid No.08788 Tr.24/07/2019** Kana Soo Wada Baxay D/Hoose ee Muqdisho "Ahna Diplicate" iyo Warqada Cadaynta Lahaansho Sabarloga **I.r.296/2019 Tr.09/07/2019** Kana Soo Baxay Xafiiska Hubinta Dukumintiyada Dhulka uuna Saxiixay Cumar Macalin Xasan "Cumar Tugumbo" Cabirkiisuna dhan yahay (**20X15**)-M, Lotto Lr. (**3774-B**), Soohdimihiisuna kala yihiin Bari Dhul dad, Waqooyi Dhul dad, Koofur Jid , Galbeed Dhul dad

WAKAALAD GAAR AH:

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhaxaltooyada Maqan ee qaan gaarka ah ee kala ah **1-C/Ilaahi Mursal Jaamac, 2-C/casiis Mursal Jaamac, 3-Fardowso Mursal Jaamac, 4-Yuusuf Mursal Jaamac,** ay Soo Wakiisheen Hooyadood **Farxiyo Muuse Jaamac,** Sida Ku Cad **Wakaalad Gaar ah REF: PNP/16612/2020 Tr.01/09/2020,** Kana Soo Baxday Nootaayo Puntland uuna Saxiixay Sargaalka Nootaayada Abuukaate Siciid C/Ilaahi Cabdi Waxaana Wakaaladaan Soo Xaqiiyey Wasaarada Cadaalada ee Dowladda Federalka Somalia, una soo wakiisheen dhamaantood in ay u maamuli karto, dhaxalkoob u samayn karto, xafidi karto, gadi karto, Hibeyn karto, dhisi karto, dayactiri karto, kireyn karto, ka saari karto, saxiixi karto kaalintooda, u doodi karto una dacwoon karto oo qareen u qaban karto, Maxkamadaha dalka hortooda u matali karto qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen Aabahood **MARXUUM:- MURSAL JAAMAC BOOTAN.**

TANAASUL:-

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhaxaltooyada kala ah 1-) C/Ilaahi Cumar Bootaan 2-)C/salaan Cumar Bootaan,3-) Nuur Jaamac Bootaan,4-) Saciid Jaamac Bootaan ay Qismigii Dhaxaleed ay Ka heleen Dhaxalka Hooyadood ay u Tanaasuleen 1- Farxiyo Muuse Jaamac, 2-C/Ilaahi Mursal Jaamac, 3-C/casiis Mursal Jaamac, 4-Fardowso Mursal Jaamac, 5-Yuusuf Mursal Jaamac, iyo 6- Maryan Mursal Jaamac, Sida Ku Cad **1- Warqad Cadeyn Tanaasul L.r.2458/2020 Tr,02/09/2020** Kana Soo Baxday Nootaayo Dr, Saciid Cali Cosoble "Xafiiska G/kacyo" **2-Warqad Cadeyn Tanaasul REF:PNP/16513/2020 Tr.01/09/2020,** Kana Soo Baxday Nootaayo Puntland uuna Saxiixay Sargaalka Nootaayada Abuukaate Siciid C/Ilaahi Cabdi Waxaana Wakaaladaan Soo Xaqiiyey Wasaarada Cadaalada ee Dowladda Federalka Somalia,**3- Warqad Cadeyn Tanaasul Kuna Taariikhaysan 07-09-2020** Kana Soo Baxay Medina Legal Services Soona Martay Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay ku leedahay Washington DC, ayna Wada Xaqiiyiyeen Wasaarada Arimaha Dibadda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Maxkamada Racfaanka Gobolka Banaadir, Wayna u Madax Banaan yihiin Gurigaas Dhaxalka ah, Sida in ay Gadi Karaan, Hibeyn Karaan, Wareejin Karaan.

EEG BOGGA SADAXAAD



QAYIM.

Ugu Danbeyn Waxay Maxkamadda degmadda Wadajir Sugeysaa in Gabadha aan qaan gaarka aheyn ee Magaceedu yahay Maryan Mursal Jaamac ay Qayim Iyo Mas'uulba U tahay Hooyadeed Farxiyo Muuse Jaamac, Una Maamuli Karto, Qismigeeda Dhaxaleed Ee Uga Soo Aado Hantida Halkaan Ku Xusan Ee Laga Dhaxlayo MARXUUM MURSAL JAAMAC BOOTAAN.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1-)C/risaaq Jaamac Maxamuud "Gaabane"

2-)Aadan C/salaan Warsame.

=SAXIIXA WAKIILKA GUUD EE DHAXALTOOYADDA KANA MID AH DHAXALTOOYADA=
Farxiyo Muuse Jaamac

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda markay aragtay codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka markhaatiyaasha, Markay aragtay dukumintiyada guriga ee uu marxuumka ku qoran yahay, Markay aragtay Wakaalada gaarka ah, Tanaasulka, ee sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida **MARXUUMIINTA KALA AH MURSAL JAAMAC BOOTAAN IYO CAASHO MAXAMUUD AXMED,** oo ay dhaxalkiisa leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugeysaa in **Farxiyo Muuse Jaamac,** oo dhaxaltooyadda ka tirsan ay Wakiil buuxa u tahay dhamaan dhaxaltooydda qaan gaarka ah iyo in ay qayim u tahay gabadha aan qaangaarka aheyn ee lagu magacaabo Maryan Mursal Jaamac, isla markaana ay awood buuxda u leedahay ku tasarufka guriga ay ka dhaxleen MARXUUM MURSAL JAAMAC BOOTAAN, ee sare ku xusan, Waana Sugitaan dhaxalkoob, wakaalad gaar ah, Tanaasul iyo qayim oo ansax ah waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"




GARSOORAHA MAXKAMADDA.

Sh.Maxamuud Salaad Cali.


